

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA
SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2023

SAYNIS



XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND



**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE
XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND**

Code Number

**IMTIXAANKA FASALKA 8AAD, 2023
IN: 2 SAAC IYO 10 DAQIIQO AKHRIS AH**

SAYNIS

TILMAAMAHA IMTIXAANKA

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 7 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:


QAYBTA	DHIBCAHA
Qaybta 1aad	50 dhibcood
Qaybta 2aad	50 dhibcood
Wadarta: 100 Dhibcood	

Waxaa iska leh saxaha

QAYBAHA	DHIBCO
QAYBTA 1AAD	
QAYBTA 2AAD	
WADAR	%

QAYBTA 1AAD: GOOBO GELI JAWAABTA SAXDA AH 50 DHIBCOOD

1. Cudurradan soo socda keebaa ku faafa galmada?
 - A. Jadeecada
 - B. Qaaxada
 - C. Jabtida
 - D. ifilada
2. Cudurradan soo socda keebaa ah kuwa layska dhaxlo?
 - A. Jabtida
 - B. Ooga-barasle (Albinims)
 - C. Waraabowga
 - D. Aydhiska
3. Waa kuwee labada xubnood ee sigaar cabbiddu dhaawacdo?



1. Wadnaha 2. Sambabada 3. Caloosha 4. Kelyaha

- A. 3 iyo 4
 - B. 2 iyo 3
 - C. 4 iyo 1
 - D. 1 iyo 2
4. Kuwan soo socda kuweebaa ah saamaynta xun ee qaadku leeyahay?
 - A. Dhibaato dhaqaale iyo mid bulsho
 - B. Taar waa maaddo dheg-dheg leh oo sambabada xirta
 - C. Dhibaato caafimaad iyo mid nafaqo darro
 - D. Afka oo nabro ka soo baxaan iyo saboolnimo
 5. Kuwan soo socda keebaa ah cudurrada la isu gudbiyo?
 - A. Aydhiska
 - B. Kansarka
 - C. Xasaasiyada
 - D. Wadna xanuunka
 6. Sheeg magaca bakteeriyada sababta cudurka waraabowga
 - A. Salmoneela
 - B. Niiseeriya
 - C. Tiriboneema ballidham
 - D. Maykoo-bakteeriyam
 7. Waxa ugu yar ee nooluhu ka samaysan yahay waa
 - A. Xubin
 - B. Nud
 - C. Unug
 - D. Hab-dhis
 8. Shaxdee ayaa ku tusaysa qaabka saxda ah ee cudurrada iyo waxa sababa?

	Cudurka	Sababta
A.	Aydhis	Bakteeriya
	Jabti	Fayras
	Waraabow	Bakteeriya


	Cudurka	sababta
C.	Aydhis	Fayras
	Jabti	Fayras
	Waraabow	Bakteeriya

	Cudurka	Sababta
B.	Aydhis	Bakteeriya
	Jabti	Fayras
	Waraabow	Fayras

	Cudurka	Sababta
D.	Aydhis	Fayras
	Jabti	Bakteeriya
	Waraabow	Bakteeriya

9. Waa maxay shaqooyinka qaybaha ku muujisan xarfaha B iyo T?

- A. Waxay kor iyo hoos u kaxeeyaan tuubada xiriirisada
- B. Waxay weyneeyaan walxaha
- C. Waxay fallaaraha ilayska ku toosiyaan ururisada
- D. Waxay hayaan weynaysada (microscope)



10. Maxaa loo yaqaan habka uu nooluhu u dhalo noole kale ama ubad?

- A. Qashin-saar
- B. Socod
- C. Quudin
- D. Taran

11. Maxaa loo yaqaan xoogga loo adeegsado walax si looga dhaqaajiyo meel oo loo geeyo meel kale?

- A. Tamar
- B. Hawl
- C. Ilays
- D. Fogaan


12. Maxay kala yihiin labada nooc ee loo dhaqdo digaagga?

- A. Ukun dhalayaal iyo Hilboolayaal
- B. Hilboolayaal iyo lab
- C. Dhedig iyo ukun dhalayaal
- D. Hilboolayaal iyo dhedig

13. Haddii ay dhacdo gubasho waxaad adeegsataa

- A. Saliid
- B. Alkahol
- C. Caano
- D. Biyo – qabow

14. Sawirka hoose waxaa uu ku tusayaa unugga dhirta iyo kan xayawaanka. Maxay yihiin qaybaha ku muujisan X iyo Y?



	Unugga xayawaanka		Unugga dhirta	
	X	Y	X	Y
A	Gidaar unug	Bu'	Bu'	Faakuyuul
B	Bu'	Xuub – unug	Bu'	Gidaar – unug
C	Xuub – unug	Saytoobalaasam	Xuub – unug	Gidaar – unug
D	Bu'	Cagaariye	Gidaar – unug	Cagaariye


15. Habkee ayuu ku tusayaa sawirku?

- A. Bacrimin
- B. Koritaan
- C. Quudin
- D. Qashinsaar



16. Tiradee ayaa ku tusaysa meerta nololeedka saxda ah ee taranka raha?

- A. 1,2,3 and 4
- B. 4,1, 3 and 2
- C. 3, 2, 4 and 1
- D. 4, 3, 2 and 1




17. Maxaa loo yaqaan habka ay dhirtu u samaysato cuntadooda?

- A. Neefsasho
- B. Footosintasis
- C. Qashin-saar
- D. Quudasho

18. Aamina ayaa kor u qaaday kartoon culayskiisu yahay 14N, waxayna saartay meel joogeedu yahay 1mitir. Xisaabi hawsha la qabtay.

- A. 15 J
B. 14 J
C. 13 J
D. 12 J


19. Xayawaanadan hoose labadee ayaa dhala ukun?



- A. 1 iyo 2
B. 2 iyo 3
C. 3 iyo 4
D. 1 iyo 3

20. Xaggee uur-jiifku ka helaa cuntada hooyada?

- A. 1
B. 2
C. 3
D. 4




21. Isle'egtee ayaa ku tusaysa habka footosintasiis ee dhirta?

- A. kaarboon laba ogsaydh + sonkor $\xrightarrow{\text{cagaariye}}$ sonkor + ogsajiin
B. Sonkor + biyo $\xrightarrow{\text{cagaariye}}$ kaarboon laba ogsaydh + ogsajiin
C. Kaarboon laba ogsaydh + ogsajiin $\xrightarrow{\text{cagaariye}}$ sonkor + biyo
D. Kaarboon laba ogsaydh + biyo $\xrightarrow{\text{cagaariye}}$ sonkor + ogsajiin

22. Jaantuska hoose wuxuu ku tusayaa shebekadda cuntada.

Labadee xayawaan ayaa ah hilib cunayaal (Hilib – quite)?

- A. 1 and 2
B. 4 and 2
C. 3 and 4
D. 3 and 5



23. Labada nooc ee tamar – makiinadeedku waa

- A. Tamar socod iyo tamar kaydsan
B. Tamar ileys iyo tamar kuleed
C. Tamar socod iyo tamar ileys
D. Tamar kaydsan iyo tamar kuleed

24. Sidee ayuu xiddigga woqooyi u caawiyaa maraakiibta iyo bad-mareenada?

- A. Wuxuu mar walba joogaa cirifka koonfureed
- B. Wuxuu mar walba joogaa cirifka bari
- C. Wuxuu mar walba joogaa cirifka galbeed
- D. Wuxuu mar walba joogaa cirifka woqooyi

25. Jaantusyadan soo socda keebaa ku tusaya urur- xiddigeedka Nin lagigay?




A.



B.



C.




D.

QAYBTA 2AAD: GOOBO GELI JAWAABTA SAXDA AH 50 DHIBCOOD

26. Muxuu jaantuska midigta u taagan yahay?

- A. Dayax
- B. Dayax-gacmeed
- C. Urur-xiddigeed
- D. Agal-caanood




27. Dadku waxay ku tiirsan yihiin xoolaha si ay uga helaan

- A. Cunto iyo wax soo saarkooda kale
- B. Loox iyo dhuxul
- C. Hilib kaliya
- D. Dhogor kaliya


28. Midkee ayaa dalagyadan soo socda aynu ka helnaa borotiin?




A. Galley



B. Digir




C. Liin




D. Canbe

29. Xayawaanadan soo socda midkee ayaa ku dhexnool biyaha?




A.



B.



C.



D.

30. Dullinadan soo socda midkee ayaa cuna qaybaha sare ee jirka xayawaanka?



A.



B.



C.



D.

31. Hababka loo dhaqo digaaga, habkee ayuu muujinaya sawirka hoose?

- A. Habka ku haynta xerada xashiishka
- B. Habka koox-kooxda ama keli-kelida
- C. Habka Foofida xorta ah
- D. Xero u samayn



32. Waa maxay wax soo saarka ugu weyn ee noolaha midigta ku sawiran laga helo?

- A. Caano
- B. Malab
- C. Sonkor
- D. Biyo



33. Walax ayaa cufkeedu yahay 500g, mugeeduna waa 50sm³. Haddaba waa immisa cufnaanta walaxdu adigoo ku muujinaya g/sm³.


- A. 450g/sm³
- B. 550 g/sm³
- C. 10 g/sm³
- D. 25000 g/sm³

34. _____ waa bir soo jiidata biraha kale ama xadiidka.


- A. Meerkuri
- B. Birlab
- C. Dhagax
- D. Loox

35. Birlabta ku samaysanta qulqul dhexmaraya duub ayaa la yiraahdaa__

- A. Birlab-danabeed
- B. Danab/ koronto
- C. Xadiid
- D. Bir



36. Labadee birlabood ayaa is-jiidanaya?



1.



3.



2.



4.

- A. 1 iyo 2
- B. 1 iyo 4

- C. 4 iyo 3
- D. 2 iyo 3

37. _____ waa aalad fududeysa hawsha.

- A. Makiinadda fudud
- B. Birlab
- C. Asiidh
- D. Danab

38. Makiinadda fuduud qabytee ayuu ku jiraa kaaryoonuhu/gaari gacanku?

- A. Gariiradaha
 B. Geerarka

- C. Kabaallada
 D. khafiyadaha



39. Asiidhadan soo socda midkee ayaa laga helaa caloosha?

- A. Salfiyuurik asiidh
 B. Laaktik asiidh

- C. Sitrik asiidh
 D. Haydarookaloorik asiidh

40. Haddii isha ay kaa galaan wax kiimiko ah waa in si deg-dega loogu dhaqaa__

- A. Biyo
 B. Saliid

- C. Caano
 D. Asiidh

41. Qalabka lagu cabbiro heerkulka waxaa la yiraahdaa

- A. Huur-beeg

- C. Heerkul – beeg

- B. Cadaadis – beeg

- D. Marawaxad dabayleed

42. Ileysku marka uu soo galo ama ka baxo biyaha waa uu qalloocsamaa. Habkan waxaa la yiraahdaa

- A. Qalloocsanka ileyska
 B. Gudbin ileys

- C. Leexin ileys
 D. Ileys noqod

43. Falgalka u dhexeeya asiidha iyo bayska waxaa la yiraahdaa

- A. Bays
 B. Alkaliin

- C. Falgalka is – fasiqidda
 D. Roob asiidha


44. Maxaa loo yaqaan gar-gaarka la siiyo qofka dhaawacmay ama bukooday?

- A. Nabaro iyo dhaawacyo
 B. Gargaar deg-deg ah

- C. Shil
 D. Jajab

45. Sheeg nooca khafiyada ee ka muuqata sawirka hoose?

- A. Khafiyada xaniban
 B. Khafiyada dhaqaaqda
 C. Khafiyadaha wada socda
 D. Calan




46. Kuwan soo socda midkee ayaa warqadda litmas u bedela guduud/casaan?

- A. Bayska
 B. Alkaliga

- C. Asiidha
 D. Biyaha

47. Wiil cufkiisu yahay 40 kg ayaa fadhiga meel 2 m u jirta taakada leexada. Waa immisa culayska gabadha si loo dheeli-tiro leexada iyadoo fadhida meel taakada u jirta 3.2 m?

- A. 25 kg
- B. 40 kg
- C. 30 kg
- D. 55 kg




48. Maxaa soo baxa marka asiidh ay lafalgasho bays?

Asiidh + bays \longrightarrow _____ + _____

- A. Cusbo + caano
- B. Biyo + cusbo
- C. Cusbo + sonkor
- D. Biyo + sonkor


49. Sawirka hoose tiradee ayaa u taagan daare-damiye?

- A. 1
- B. 2
- C. 3
- D. 4



50. Dhagax cufkiisu yahay 200 g ayaa lagu riday dhululubo biyo ku jiraan oo cabbirkeedu yahay 20 cm^3 , heerkii biyuhu kor ayuu u soo kacay wuxuuna gaaray 80 cm^3 .

Waa immisa cufnaanta dhagaxu?



- A. 3.3 g/cm^3
- B. 4.3 g/cm^3
- C. 5.3 g/cm^3
- D. 6.3 g/cm^3

Dhammaad